لا إله إلا الله
الله رسول محمد
المكتب الصحفي
PRESS OFFICE
XAFIISKA WARFAAFINTA

بسم الله الرحمن الرحيم
للنشر العاجل
FOR IMMEDIATE RELEASE

حركة الشباب المجاهدين
HARAKAT AL-SHABAAB AL MUJAHIDEEN
XARAKADA MUJAAHIDIINTA AL-SHABAAB

# 50 Sano kadib Dilkii Culimada: Mu'assasada Al-Kataib oo Baahin Doonta Dokumentari Cusub

**15 Rabi' Al-Awal 1447H (07 September 2025)**

قال الله تعالى: {وَكَأَيِّنْ مِنْ نَبِيٍّ قَاتَلَ مَعَهُ رِبِّيُّونَ كَثِيرٌ فَمَا وَهَنُوا لِمَا أَصَابَهُمْ فِي سَبِيلِ اللَّهِ وَمَا ضَعُفُوا وَمَا اسْتَكَانُوا وَاللَّهُ يُحِبُّ الصَّابِرِينَ * وَمَا كَانَ قَوْلَهُمْ إِلَّا أَنْ قَالُوا رَبَّنَا اغْفِرْ لَنَا ذُنُوبَنَا وَإِسْرَافَنَا فِي أَمْرِنَا وَثَبِّتْ أَقْدَامَنَا وَانْصُرْنَا عَلَى الْقَوْمِ الْكَافِرِينَ * فَآتَاهُمُ اللَّهُ ثَوَابَ الدُّنْيَا وَحُسْنَ ثَوَابِ الْآخِرَةِ وَاللَّهُ يُحِبُّ الْمُحْسِنِينَ} [آل عمران: ١٤٦ - ١٤٨]

Loolanka udhaxeeya xaqqa iyo baadilka waxaa mar kasta hormuud u ahaa culimada Rabbaaniyiinta ah oo xaqqa caddeeya kuna camal fala. Culimada ayaa had iyo goor ahaa ileyska ay ummadda Muslimka ah iftiinsato iyo gabbaadka ay ka dugaashato dulumaatka fitanta iyo jahliga.

Marka laga hadlayo Soomaaliya culimada waxay bulshada ku dhex lahaayeen maqaam iyo maamuus ay ku mutaysteen fidinta cilmiga, baraarujinta bulshada iyo ka hortagga gumeystaha dalka kusoo duuley iyo afkaartooda gurracan. Kaalinta culimada waxay si cad u muuqan jirtay xiliyada ay taaganyihiin xasaradaha iyo nawaazisha ummada lasoo gudboonaada iyagoo si cilmi, karti iyo geesinimo leh xaqqa ula jahri jiray.

Xiligii ay mawjadaha ilxaadka iyo kufriga usoo duseen geyiga Soomaaliyeed, xukuumadii shuyuucigana ay dalka ka hirgelisay waxa loogu yeero Xeerka Qoyska sanadkii 1975, culimada Rabbaaniyiinta ayaa ahaa kuwa u istaagey difaaca Qur'aanka kariimka, wuxuuna Allaah ku sharfay ilaalinta diintiisa iyo koryeellidda Kitaabkiisa, si ay ummada Muslimka ah ee Soomaaliyeed uga samatabixiyaan gaalnimada qayaxan ee dalka lagu soo rogay.

Hadaba iyada oo ay 50 sano ka soo wareegatay hirgelintii xeerka qoyska iyo dilkii culimada xaqa u istaagay, maxaa dalka iska bedelay? Maxay ku kala duwanyihiin nidaamkii shuyuuciga ahaa ee culimadii laayay, aayadaha Qur'aankana inkiray iyo nidaamka dimoqraadiga ah ee uu Xasan Gurguurte maanta hogaaminayo? Su'aalahan iyo kuwa kale waxay Mu'assasada Al-Kataib dhowaan ku bidhaamin doontaa dokumentari ku saabsan dhacdooyinkii 1975 ee gilgilay geyiga Soomaaliyeed iyo mahadhooyinkii ay reebeen.

Al-Kataib

﴿ وَلِلَّهِ ٱلْعِزَّةُ وَلِرَسُولِهِۦ وَلِلْمُؤْمِنِينَ وَلَٰكِنَّ ٱلْمُنَٰفِقِينَ لَا يَعْلَمُونَ ﴾

*"But honour belongs to Allah and His Messenger, and to the Believers; but the Hypocrites know not"*